# Haweenka Qaxootiga ah

BritishRedCross



## Xoojinta Dhijitaalka iyo Mashruuc Ku xidhida.

**Kullanka 3 -- Badbaadada Dah**

Home Office

The power of kindness

# Soo dhowow!

**Maanta waxaanu:**

- Ka hadal tallaabooyinka badbaadada dhijitaalka ah iyo tilmaamaha badbaadada internatka.
- Ka hadal sida loo aqoonsado noocyada khatarta guud ee onlaynka ah
- Ka hadal sida loola xidhiidhiyo tallaabooyinka badbaadada onlaynka saxaafada bulshadda iyo xidhiidhada dadka u dhexeeya nolosha runta ah.



# Sharciyada dhulka

- Meel qarsoodi ah
- Meel badbaado ah
- Telefoonada aamusan
- Noqo qof ixtiraam badan
- Aan niyada wax ka qiimayn
- Hadal mar wakhtigiiba
- Zoom codku haka xidhnaado haddii aan la hadlayn
- **Waydiiso haddii aad shay u baahan tahay in lagu celiyo!**

- Waa sax inaan la ogaan



# Badbaadada dhijitaalka ah



Waa maxay macnaheedu

Sababtee ayay muhiim u tahay?

# Lahaanshaha erayga sirta ah oo xogan

- Adkee eraygaaga sirta ah markaas tan
- si fudud uma malayn karaan dadka kale

- U beddel erayada sirta si caadi ah

- Ha isticmaalin erayada sirta ahoo isku mid ah kooto kasta

- Habbee su'aalaha amnga ah xaalada aad ilowdu eraygaaga srita ah.

- Si loo sameeyo erayaga sirta oo xoogan talo soo jeedintu waa in la doorto saddex eray oo aan isku toosnayn, kuwan isku hagaaji oo ku dar tirooyin, xarfaha waa wayn iyo astaamo tusaale: Cat!PotatoS0fa7



See Metropolitan Police (2017) #threerandomwords https://www.youtube.com/watch?v=3aY_EPgi0VU



# Ka ilaalinta qalabyadaada fayrasyada

- Kombuyuutarada,telefoonada iyo qalabyada kale waxay heli karaan fayrasyada sababi karo waxyeelo badan.

- Sooftiweerka ku lidka ah fayraska waa barnaamijka kombuyuutarka loo isticmaalo si looga hortaggo, loo ogaado oo looga saaro fayraska.

- Laabtobkaaga waxaa lagu shubay Difaacada 12 bilood ee windhowyada. Intaas ka dib, waa masuuliyadaada inaad xaqiijiso laabtobkaaga inuu leeyahay ilaalinta sooftiweerka joogtada ah.

- Sooftiweerka ku lidka ah fayraska waxa uu u baahan yahay si caadi ah loo cusboonaysiiyo.

The power of kindness

# Noocyada guur eekhatarta onlaynka ah

| Iimaylada Khiyaamada ah | Iimaylada khiyaamada loo diro | Sooftiweerka fayrasyada guud – 'Malware' |
|---|---|---|
| - **Iimaylka ama fariinta qoraalka, inta badan wadata hadaf lagugu qanciyo adiga inanad riixdo linki..**<br>- Marka aad riixdo waxaa laguu diri karaa websayd aan badbaado ahayn kaas fayras ku shubi kara kombuyuutarkaaga, ama xaga erayadaada sirta iyo macluumaadka gaarka ah.<br>- Waxa uu i sticmaali kara aluqadda abuurta cadaadiska in tallaabo laqaado' sida furida linkiga, bixi faahfaahinta ama riix lifaaqa. | - fariimaha isku dayo in **lagugu khiyaameeyo bixinta macluumaad xasaasi ah** ida xogta gaarka ah;<br>- fariimaha waxay u eekaan karaan run iyo kuwa lagu qanco oo inta badan waxay u muudaan inay ka yimaadeen bangiga ama il kale oo lagu kalsoon yahay<br>- waxaad dooni kartaa inaad dib u geliso erayga sirta, xaqiiji taariikhda dhalashada ama xaqiiji lambarka kaadhka kiridhitka;<br>- marka faahfaahintaada dheeraadka ah la galay, dembiilayaashu waxay u isticmaalaan inay galaan dembiyada khiyaamada sida tuuga aqoonsiga iyo khiyaamada bangiga. | - Sooftiweerka uu sameeyay qof si ay waxyeelo ugu gaysato qalabyada.<br>- wakhtiyada qaarkood waxa uu urursha macluumaad ama xogta lagu kaydiyay qalabkaaga oo waa uu gudbiyaa.<br>- Sidoo kale loo yaqaano **ransomware, viruses, worms, trojan, horses, spyware, adware, scareware** iyo **crimeware**. |

# Aqoonsashada iimaylada khiyaamada ah.

- Miyaad taqaanaa qofka soo diraha ah? Ma waxay kugu salaamayaan salaan guud?
- Miyay jiraan khaladaadka higaada ama ma si liidata ayaa loo qoray?
- Miyay doonaysaa inaad samayso shay ama miyuu jiraa dareenka degdega ah ama miyay kuu hanjabaysaa?
- Miyay u eegtahay mid aad u wanaagsan inay run ahaato?
- Fur cinwaanada iimaylka ee fariinta laga soo diray. Miyay leedahay magaca qaybta ee saxda ah?
- Ma lama filaabnaa mise waxay ka timid shirkad aad ganacsi la leedahay.?
- Miyaa si laguugu soo hagaa websayd kale?

The power of kindness

# Websaydyada badbaadada ah

Boggaga ka soo booda websaydyadu inta badan la iskuma halayn karo.







Raadi calaamada qufulka iyo/ama https muuji haddi websaydku amni yahay.

The power of kindness

# Raadinta badbaadada ah




The power of kindness

# Masaxida taariikhda raadinta




The power of kindness

# Ku xidhnaanta dadka onlayn ahaan



- Setinka gaar ahaanshaha ee saxaafada bulshadda
- Macluumaadka saxaafada bulshadda ee injiinada raadinta

The power of kindness

*Zahra waxay leedahay inaadeer aad ugu dhow iyada. Inaadeerkeed waxa uu u dhaqmaayay si ka duwan sidii hore dhawaan isagoo u muuqda inuu cadhaysan yahay, xanaaqsan yahay, oo si cadhaysan ayuu u baadhay telefoonkeeda wakhtiga markay wada joogeen. Ugu damaysatii Zahra inaadeerkeed waxa uu u sheegtay inaanay si wanaagsan u seexan oo ay aad uga dhibtoonayso hanjabaadaha uu sameeyay ninkeedii hore, kaas oo ay kala maqan yihiin. Waxa uu fariimaha ugu soo diraa si caadi ah oo waxa uu soo diraa iimaylo uu ku sheegayo inay tahay xaad dhibleh iyo hooyo, oo ay dulaysay labbada qoysba, oo waa inay ku soo noqoto si ay isaga ula noolaato. Inaadeerka Zahra aad ayuu ugu dhibaatooynayaa inuu tan dib uga sheekeeyo.*

*Waxay sharaxday in dheer in ninkeedii hore uu haysto sawirkeedii oo qaawan, kaasoo ay qaadeen si wada jir ah mar hore xidhiidhkoodii. Waxa uu ku hanjabay u dirida sawirada qaawan qoyskeeda haddii aanay ku soo noqon isaga.*

**The power of kindness**

# Xidhiidhka Onlaynka ah

| | |
|---|---|
| **Khiyaamada jacaylka ah**<br>- Horumarinta xidhiidhka dadka u dhaxeeya si loo helo kalsooni oo ka dib loo waydiisto lacag ama macluumaadka gaarka ah.<br>- isticmaalaha horumarka kalsoonida iyo lifaaqnida caadifada si uu u waydiisto caawimo, caadi ahaan lacag, laakiin sidoo kale waxay heli kartaa xidho ama waxay bixisaa cinwaan. | **U xoog sheegashada internatka**<br>- U xoog sheegashada ka dhacda onlaynka ama isticmaalka teknoolajiga.<br>- Inta badan ku xoog sheegta boggaga isku xidhka saxaafada bulshadda sida Facebook ama Twitter, isagoo fariimo ka diraya ama madalaha la qoraalada la is dhaafsado.<br>- Waxa uu samaayn karaa labbadaba dadka waa wayn iyo carururta. |
| **Feedhashada**<br>- Dhisida xidhiidhka aaminaada ah iyo xidhiidhka lala leeyahay qofka markaas waxay ka faa'iidaysan karaa oo maamuli karaan iyaga, inta badan wixii ah ujeedooyin galmada ah.<br>- Ku khasbida samaynta falal xun oo onlayn ah carruurta iyo dadka dhalin yarta ah waa qaab ku xad gudubka ilmaha ah. | **Fariimaha galmada ah iyo Sawirada qaawan ee Aargoosiga ah**<br>- Bilaabida, gaarka ah,waxyaabaha galmada ah, miduun sawiro ama fiidyowyo, ama qof kale, isagoon haysan oggolaanshhooda iyo leh ujeedada sababida yaxyax ama dhib badan.<br>- Wadaagida sawirada dadka yaryar waa ku xadgudubka carruurta. |
| **Dabagalka internatka iyo ka warhayn**<br>- Dabagalku waa nooc dhaqanka ah ee ka yimid qof kale kaas oo sabab baqdin ama dhib badan. Marka ay onlaynka tahay waxaa loo yaqaanaa dabagalka internatka<br>- Dabagalka dhanka internatkawaxa uu saamyn xun ku yeelan karaa dhibanaayshiisa oo waa fal dembi. | **Xad gudubka guriga**<br>- Cilmi nafsi ahaan, jidh ahaan, dareen ahaan ama maaliyada xad gudubka ah ee uu ku kaco lamaanaha, lamaane hore, xubin qoyska ah ama daryeele.<br>- Qof xadgudbe ah suuragal ahaan waxa uu si khalad ah u isticmaalaa internatka ama qalabka internatka lagu isticmaali si uu u fiiriyo, u eego ama u maamulo dhibaha. |

The power of kindness

# Horumarinta badbaadada dhijitaalka ah

Waa maxay qalabyada dhijitaalku?

Saxaafadee bulshadda ah ayaad isticmaasha?

Maxay noqon lahayd taladaadu?

The power of kindness

Duubida codka

Duubida fiidyaha ah

Maamulka codka

Xog Ururinta




Kootooyinka la wadaago

Rimoodka tiifiiga

Waxbarashadda mashiinka

Goobta raad raaca

Saxaafada bulshadda

The power of kindness

# Horumarinta badbaadada dhijitaalka ah

| | |
|---|---|
| Qiimee | Qiimee waxa uu yahay macluumaadka onlaynka ah ee jira ee kugu saabsan adiga ee Facebook iyo Twitter |
| Beddel | Beddel iimaylkaaga iyo erayada sirta ah ee furaha kootooyinka onlaynka ah |
| Tirtir | Tirtir kootooyinka onlaynka jira gaar ahaan haddii ay ka kooban yihiin tiro badan oo macluumaad ama sawiro ah. |
| Dib u eegid | Dib u eeg dhammaan samaynta sirta gaar ahaanshaha iyo amniga |
| iska ilaali | Iska ilaali mareegaha dad waynaha |
| Xadid | Xadid waxaad wadaagto |
| Tirtir | Waxaad tirtiri kartaa taariikhdaada raadinta ee Chrome, Firefox, Internet Explorer iyo Safari. |
| Habbee | Samayso erayga sirta ama PIN kombuyuutarkaaga ama qalabkaaga moobilka oo xaqiijiya inaad keligaa geli karto. |
| Iimayl | Iimayl: Waa muhiim in la doorto erayga sirta ah ee iimaylkaaga oo aan dhici karin inuu maleeyo qof kale. |

# In kooban

Maanta waxaanu:

- Ka hadlay talooyinka aasaasiga ah ee badbaadada dhijitaalka ah.
- Ka hadlay qaybo tusaalooyinka khatarta onlaynka ah iyo sida loo aqoonsado iyaga.
- Ka hadlay talo soo jeedinta si loo hubiyo oo loo horumariyo gaar ahaanshaha iyo badbaadada dhijitaalka onlaynka ah.

**Si muhiim ah, badbaadadadhijitaalmku waxay ku sabasan tahay wacyi gelinta onlaynka ah.**



The power of kindness

# Erayada muhiimka ah

**Qalabka** – qalabka korontada ah ee ku xidhmi kara internatka

**Wacyo gelinta dhijitaalka ah** – horumarinta aqoonta khataraha iyo dheefaha isticmaalka internatka iyo qalabyada ku xidhan internatka.

**Badbaadada dhijitaalka ah**– dhaqamada iyo caadooyinka aad ku ilaalinayso naftaada, kuwa kale iyo badbaadada macluumaadkaaga gaarka ah marka aad isticmaalayso internatka.

**Xad gudubka onlaynka ah** – dhaqan waxyeelo iyo axmaqnimo leh ee qofka kale ee ka dhaca internatka.

**Khatarta onlaynka ah** – khatarta dhibaatada sababta dhacdo aan la rabin ama fal iyaddoo la marayo internatka

**Erayga sirta ah** - taxanaha sirta ah ee xarfaha oggolaado in la galo nidaamka kombuyuutarka ama qalabka

**Setinka gaar ahaanshaha** – maamulka la isticmaali karo si loo furo ama loo xadido gelida macluumaadka saxaafada bulashadda.

**Saxaafada bulshadda–** websaydyada iyo barnaamijyada kombuyuutarka ay isticmaalaan dadku si ay ugu wada xidhiidhaan oo ugu wadaagaan macluumaadka internatka, addoo isticmaalaya kombuyuutarka ama telefoonka moobilka..

The power of kindness